

Tetanus, Diphtheria and Polio (Td Polio) Vaccine

Talaalku (ama iraabka) waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururka National Advisory Committee on Immunization waxa ay si adag isugu raaceen talaal joogto ah.

Talaalkani wuxuu isugu jiraa saddex. Waxuu dadka ka difaaca teetanada, diphtheria (gawracatada), iyo polio-da (qalal-ka). Waxa la siiyaa dadka da'doodu ka wayn tahay toddoba sanno. Talaalka looga-ga hor tegayo teetanada, gawracatada iyo qalalka waxa sharciyan looga baahan-yahay dhamaan caruurta aada dugsiyada Ontario (haddii aan laga dhaafin).

Waa maxay teetanadu? Teetano ama daaman isku dhegu waxa weeye cudur halis ah kaas oo iman kara marka wasakh ay la socoto baakteeriyada tetanadu gasho meel maqaarka dilaacsan. Baakteeriyada teetanada waxa lagu arkaa meel kasta gaar ahaan ciida, siigada iyo saalada xoolaha. Dadku iskama qaadaan. Teetanadu waxay xanuujisaa muruqyada qoorta, gamcaha, lugaha iyo caloosha iyo garaac xanuun badan oo lafaha jebin kara. Xitaa haddii hore loo ogaado, teetanadu waxay dishaa laba 10kii qofii qaada.

Waa maxay gowra-catadu (Diphtheria)?

Gawracatadu waa cudur halis ah oo ku dhaca sanko, cunaha iyo maqaarka. Waxay keentaa cuno xanuun, xumad iyo jidhi-dhico. Way ku xumaan kartaa qofka waxaanay keeni kartaa neef qabatin, wadne joogsi iyo dareemada jidhka oo dhaawacma. Gawracatada waxaa ku dhinta hal qof tobankii qofba. Badi waxa laga kala qaadaa qufaca iyo hindhisada.

Waa maxay polio-du (Qalal-ku)? Polio-du waa cudur halis ah oo laga qaadi karo biyaha la cabo ama cunto ay la socoto baakteeriyada polio-du. Waxa kale oo laga qaadaa dadka qaba. Cudurku wuxuu dhaawici karaa dareemayaasha qofkuna curyaan ayuu noqon karaa noloshiisa. Wuxuu curyaaminkaraa muruqyada loo adeegsado neefsashada, hadalka, cunada iyo socodkaba. Sidoo kale waa lagu dhiman karaa.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka Td Polio ka hor tegi karaa teetanada, gawracatada iyo qalalka?

Marka la qaato talaalada Td Polio ee la isugu tala galay, waxay 100 kiiba boqol dadka ka hor tagtaa teetanada, in ka badan boqolkiiba 95 dadka waxay ka difaacdaa gawracatada, qalalkana waxay ka celisaa dadka boqolkiiba 99. Dadka talaalka qaata haddii cuduradani ku dhacaan talaalku wuu u fudu-deeyaa.

Da'dee la isku siiyaa talaalka Td Polio?

Talaalka Td polio waxa la siiyaa dadka da'doodu tahay toddoba sanno ama ka wayn tahay si uu uga hor tago teetanada, gawracatada iyo qalalka. Waxa talaal suubis ah la isa siiyaa marka qofka da'diisu noqoto 15 sanno. Talaalkan ka dib, talaalo suubis ah oo lagaga hortegayo teetanada, gawracatada iyo qalalka ayaa 10kii sannoba la isa siiyaa si loo helo ka hortag joogto ah.

Ma yahay talaalka Td Polio mid aan wax yeelo lahayn?

Haa. Dhibaatooyinka lagala kulmi karo talaalka Td Polio way sahlan yihiin waxayna ku dhamaadaan mudo yar oo maalmo ah kadib marka talaalka la qaato. Damqasho yar, barar iyo meesha irbada lagu muday oo casaata. Dad tiro yar ayaa yeesha xumad/qandho fudud, cuntada niyad u waaya ama daal isku arka maalin ama laba maalmood kadib marka ay talaalka qaataan.

Dumarka uurka leh iyo dadka kaleba ka ma qaadi karaan qof muddo yar ka hor lagu muday talaalkan. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii saddex maalmood gudahood talaalka kadib astaamahani soo baxaan:

- Caaro
- afka ama wejiga uu bararo
- neef qabash
- midabka oo doorsooma qofkuna u ekaado siddii wax daan-daansan
- yeesho xumad badan (ka badan 40 C ama 104 F)
- suuxo
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka Td Polio?

Dhakhtarka ayaa go'aamin kara inaan qofka la siin talaalka Td Polio haddii uu qofku:

- leeyahy xumad badan ama cudur ka xun hargab
- uu xasaasiyad xun ka qaado antibiotics-ka loo yaqaan neomycin or polymyxin B
- uu xasaasiyad xun ka qaado talaalkan(anaphylaxis)
- uu xasaasiyad xun ka qaado qayb ka mid ah talaal-kan

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka Td Polio?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada

Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha ah" ku diiwaan geliyo talaalka. Waxaad u baahan doontaa diiwaan gelintan inaad siiso rugtaada caafimaadka marka ilmuhu dugsiga bilaabay iyo marka talaalo kale la siiyo. Diiwaankaagan meel adag dhig!